Gacaliye ganacsiga adeegga cuntada Seattle,

Kani waa cusboonaysiin ka timid Adeegyada Dadweynaha ee (Seattle Public Utilities (SPU)) oo wata shuruudaha adeegga cuntada cusub. Adeegyada Dadweynaha Seattle waxay dib u eegtay Xeerka Agaasimaha SW-500: "Shuruudaha iyo Ka-reebitaanka Ku Meel Gaarka ah ee Badeecadaha Adeegga Cunnada iyo Baakadaha." Xeerka dib loo eegay waxa uu dhaqan galay Julaay 1, 2023.

Sida ku cad xeerka dib loo eegay:

- Dhammaan alaabada adeegga cuntada waa inay ahaadaan kuwo dib loo isticmaali karo, dib loo warshadayn karo, ama la burburin karo, iyada oo ka reebban xaddidan oo loo oggol yahay ka-dhaafis ku meel gaar ah.
- Qaybaha koobabka ee cuntooyinka kulul ama daboolan uma qalmaan ka-dhaafis ku meel gaar ah shuruudaha Xeerka degmada Seattle (Seattle Municipal Code SMC)21.36.086. Dhammaan koobabka hal-isticmaalka ka hooseeya 3 inji dhexroorku waa inay ahaadaan kuwo la dhalaalinayo.
- Weelka adeegga cuntada ee warqadda Kafeyga waxa kaliya oo la ogol yahay haddii la burburin karo.
- Alaabada adeega cuntada ee kali ah ee loo isticmaalo cuntada lagu isticmaalo dhismaha waa in ay ahaato mid la burburin karo.
- Alaabooyinka la burburin karo adeegga cuntada ee la kasban karo waa in ay buuxiyaan shuruudaha Xeerka Washington oo dib loo eegay (Revised Code of Washington-RCW) Cutubka 70A.455, "Nabaad-guurinta Alaabada Caadiga ah". Sida uu qabo sharcigan, alaabta la burburin karo waa in:
    - Loo caddeeyo inuu yahay wax burburisey qolo saddexaad ama laga sameeyo gebi ahaan alwaax ama fiber aan lahayn daahan caag ah.
    - Diyaarsan oo si sahal ah loogu aqoonsan karo inuu yahay mid laburburin karo, oo ay ku jirto muujinta ereyga
      ''Burburin''oo muujinaya calaamadaynta iyo midabaynta oo buuxisa heerarka warshadaha.

  Faahfaahinta ku saabsan shuruudaha hoos yimaada sharcigan ayaa laga heli karaa halkan (https://apps.ecology.wa.gov/publications/documents/2307022.pdf).
- Qalabka adeegga cuntada ee keli ah lala isticmaalo waa in lagu bixiyaa si waafaqsan shuruudaha RCW Cutubka 70A.245.080, "Adeegga Ware Ikhtiyaar ah". Sida uu dhigayo sharciga gobolka,maacuunta,tubada yar lugu cabbo biyaha,baakadaha maraqa, iyo daboolka koobabka cabitaanada qabow waxa kaliya oo lagu bixin karaa macmiilka codsiga ama adiga oo istimaalaya - weelasha adeegga ama alaab-qeybiyeyaasha.
  Faahfaahinta ku saabsan shuruudaha hoos yimaada sharcigan ayaa laga heli karaa halkan (ecy.wa.gov/serviceware).

Ganacsiyada adeegga cuntada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay:

- Hayso sahay ku filan oo ah ubada yar lugu cabbo biyaha balaastiig ah oo la laaban karo ama ubada yar lugu cabbo biyaha caag ah oo la tuuri karo si loo siiyo macaamiisha marka loo baahdo xaalado caafimaad ama jireed dartood; iyo
- Bixi agabka adeega cuntada ee dib loo isticmaali karo, iyo maacuunta cuntada lagu isticmaalo goobta mar kasta oo ay suurtagal tahay.

Waxaan ku soo lifaaqnay waraaqo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha ganacsiyada adeegga cuntada.

Si aad u aragto liiska buuxa ee shuruudaha alaabta adeegga cuntada, fadlan booqo shabakadayada: bit.ly/spu-food-packaging

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka baakadaha cuntada ee Seattle, oo ay ku jiraan agabka bilaashka ah iyo farsamada Caawinta, fadlan la xidhiidh 206-343-8505 ama ku soo jawaab email ahaangreenbusiness@seattle.gov.

Si daacad ah,

Adeegyada Dadweynaha Seattle Barnaamijka Ganacsiga Cagaaran
206-343-8505
GreenBusiness@seattle.gov